

Jirrada Shanaad

Taariikhda:

Gacaliye Waalid ama Wakiil,

Ilmahaagu wuxuu la kulmay xanuunka shanaad (loona yaqaan erythema infectiosum intuu joogay xanaanada ilmaha.

Muxuu yahay jirrada shanaad?

Jirrada shanaad waa jirro sahlan oo uu keeno fayras loo yaqaan 'human parvovirus B19'. Safka jirrada shanaad waxay badi ka dilaacdaa xaanada ilmaha iyo dugsiyada.

Waa maxay calaamadaha xanuunka jirrada shanaad?

Ilmaha bukaa badi wuxu yeeshaa dhabano guduudan ("xabuubka dhaban-dhirbaaxan") maalmaha hore, waxa dabeed yimaada finan gaduuda gacmaha, lugaha iyo dhabarka. Si aan badnayn, ilmuhu wuxu yeelan karaa finan cuncun leh (sharaabaadka iyo galoofyada. Xabuubku wuxu badi ku raystaa 7 ilaa 10 maalmood, laakiin wuu iman karaa oo tegi karaa ayaamo ama xataa bilo. Calaamadaha hargabka ama qandho ayaa laga yaabaa in la arko kahor xabuubka. Dadka waaeyn ee qaba jirrada shanaad waxa isku arki karaan xabna xanuun iyo xabuub. Caruurta qaar iyo dadka waaeyn ee qaba jirrada shanaad ma yeeshaan calaamooyin.

Intee ayey gaadhsiisan tahay ba'naanta xanuunka jirrada shanaad?

Jirrada shanaad waa sahlan tahay iyaadana iska tagta. Dadka ay daciiftay nidaamkooda iska caabinta jirrooyinka ama qaba xanuunada dhiiga ama dhaxlay jirrooyinka dhiiga, hase ahaatee, jirrada shanaad waxay noqon kartaa halis oo waa in lala tashado takhtar. Jirrada shanaad waxay ku keeni kartaa dhib uur-ku-jirta muddada uurka.ka uurka leh ee la kulma jirrada shanaad waa inay arkaan takhtarkooda.

Siduu qofku u qaadi karaa xanuunka jirrada shanaad?

Fayraska keena jirrada shanaad waxa laga arkaa dheecaanada neefsiga (duufka sanko, afka iyo dhuunta). Fayrasku wuxu ku faafaa markuu qof taabto dheecaan qof qaba.

Intee in le'eg ayey ku qaadataa inuu qofku qaado jirrada shanaad kadib marka uu qofka la kulmo?

Badi wuxu qaataa 4 ilaa 14 maalmood min wakhtiga qaba ay calaamooyin ka muuqanayaa.

Goorma ayaa qofka qaba jirrada shanaad uu cid qaadsiin karaa?

dadka qaba jirrada shanaad waa faafin karaan kahor intaanay ka soo yaacin xabuubku. Kuwa leh finanka lagama qaadi karo.

Sideen u gargaari karaa kahortaga faafitaanka xanuunka jirrada shanaad?

- Gacmaha si fiican u dhaq oo ku dhaq saabuun iyo biyo, gaar ahaan kadib markaad sanko iska nadiifiso ama afka.
- Dabool hindhisada iyo qufaca oo ku rid xaashida xashiishka.
- Nadiifi, dhaqdhaq, oo jeermiska ka-dil alaabta caruurto ku ciyaarto ee xanaanada ilmaha kadib taabashada candhuuf.
- Iska-jir wadaaga cuntada, cabbitaanka iyo alaabta qof ahaaneed ee afku taaban karo sida qalabka cuntada lagu cuno, cadayga ama tuwaalada.
- Ilmahaaga ku hay guriga markuu qandho qabo.

Maxay tahay daawada xanuunka gacanta, cagta iyo afka ku xanuunka gacanta, cagta iyo afka?

Sida badan, raysashada calaamooyinka (oo ah, raysashada qandhada, xanuunka iyo cuncunka) ayuun baa ha daawada keliya ee looga baahan yahay jirrada shanaad.

Haddii ilmahaagu qaado xanuunka gacanta, cagta iyo afka, inuu ka joogo miyaa xanaanada ilamaha?

Maya, maadaama aanu lahayn calaamada kale oo u baahan ka saaris.

